



## **Seerka ka soo horjeeda xadgudubka dumarka**

Dad badan ayaa ku sugar xadgudub cabsi ay ka baqayaan in ay booliiska u sheegaan falalka dagaalka guriga/qoyska ama waxay ka cabsadaan in ay raadsadaan hababka kale ee loo helo kaalmo.

Sharciga Dagaalka Loo Geysto Dumarka (Violence Against Women Act) (VAWA) waxaa laga helaa jidka gaar ahaan loo maro xaaladda socdaalka shariyeysan ee loogu talagalay dhibaneyaaasha xad gudubka guriga kuwaasoo laga yaabo in ay isku haleyaan kuwa ku xad gudba si ay u soo gudbiyaan codsi ay iyaga ku helaan aqoonsi. VAWA waxay dhibaneyaaasha loo geysto xumaanta ee qaraabo sokke la ah muwadiniinta Mareykanka iyo kuwa sharciga ku daggan in ay iskooda u soo gudbiyaan xaaladooda (codsiga-qofka), lana ogeysiin ku-xadguduba, lagana qaadanin ogolaasho, ama ka-qeybgal. Jidkaan waxaa loo ogol yahay xaasaska iyo caruurta ay xumaan ka soo gaartay muwadiniinta Mareykanka iyo kuwa sida joogtada sharii ku daggan waddanka (kuwa haysta Kaarka Cagaaran) (Green Card holders), iyo waalidiinta xumaanta ka soo gaartay muwadiin Mareykan ee jira 21 sanno ama ka weyn. Dadkaan waxay xaq u yeelan karaan xaaladda dagganaha sida joogtada ah ku daggan (Kaarka Cagaaran) (Green Card), ruqsadda sharciga, iyo manafacaadka la siyo dadweynaha. Arjiileyaasha waxay hawsha ku bilaabayn soo buuxinta Foomka I-360.

Shariyada VAWA waxaa si siman loogu dabqaan qof kasta iyadoo aan la fiirinin jaadka uu yahay qofka. Fadlan booqo [uscis.gov/humanitarian/abused-spouses-children-and-parents](http://uscis.gov/humanitarian/abused-spouses-children-and-parents) si aad u heshid macluumaad badan.

## **Dhibaneyaaasha aan ahayn muwaadin waa in ay:**

- Xariir wanaagsan la leeyahiin Muwaadin Mareykan ah ama yahay ku Xadgudbe Haysta Kaarka Cagaaran (Green Card Holder):
- Daggan ama la dagganaa ku-xadguduba;
- Leeyahay asluub wanaagsan; iyo
- In uu ahay dhibane la garaacay ama loo geystay cadaawad darran

## **Muhiimadda ay Leeyahiin Shaqaalaha Safka-Hore (Front-Line Workers)**

Sharciga Mareykanka wuxuu dhovr badbaado siiyaa dadka aan u dhallanin aan hayasanin warqado ay dhibaato ka soo gaartay dambti, sida dagaalka guriga ama sharcidarro ku-musaafurinta aadanaha. Waxaa jira dad badan oo ka cabsada in ay soo sheegaan in ay ahayeen dhibaneyaa loo geystay dambti maxaa yeelay waxay ka walwalaan in laga saaro (dhoofiyo) Mareykanka.

Aqoonyaanada sida sarakiisha boliiska, daryeelka caafimaadka iyo bixiyeyaasha adeegga bulshada, garsooreyaasha, iyo xeer ilaaliyeysaashaa badanaa kuwa ugu horeeyo in ay arkaan calaamadaha dhibaatada la geysto, sidaas darteedna waxay ku sugar yahii xaalad gaar ah ay macluumaad iyo kaalmo ku siiyan dhibaneyaaasha. Buug yaraahan waxaa loo sameyay in lagu taageero lala dadaalo shaqaalaha safka-hore.

Dhamaan wakaaladaha ka tirsan Waaxda Ammaanka Waddanka (Department of Homeland Security) (DHS), kana mid ah Adeegyada Muwaadinka iyo Socdaalka Mareykanka (US Citizenship and Immigration Services) (USCIS), waxaa shariyan laga reebay in ay kashifaan in qof dhibane ah uu soo dalbaday noocyada badbaadinta socdaalka ee looga hadlay buugyaraahan, lagana reebo xaaladaha qaar.



Booqo Qeybta  
**"Humanitarian"**  
bogga internetka USCIS  
[uscis.gov/humanitarian](http://uscis.gov/humanitarian)

Si xambaarka aadanaha la tuhunsaan yahay loogu sheego hirgelinta sharciga Federaalka, kala xiriir leenka talo-bixinta HSI

**866-347-2423  
(866-DHS-2-ICE)**

Si aad ula xariirtid Telefoonka Sharci-darro ku-musaafurintaAadnaha ee Qaranka (National Human Trafficking Hotline), wac

**888-373-7888**

## **Fursadaha Socdaalka ee la siiyo Dhibaneyaaasha Dambiga**



**U.S. Citizenship and Immigration Services**

## **Macluumaadka loogu talagalay Shari fulinta, Bixiyeyaasha Daryeelka Caafimaadka, iyo Shaqaalaha Kale ee ka Shaqeeyso Safka Hore**

Sharciga Rabshada Loo Geysto Dumarka T Xaaladda Qofka aan soo Haajirin Xaaladda Qofka aan soo Haajirin U



**U.S. Citizenship and Immigration Services**

## Xaaladda Qofka aan soo Haajirin T


Xaaladda qofka aan ahayn muhaajirka T (loona yaqaan fiisada T) waxay badbaado ku meel gaar ah siisaa dhibbaneyaasha qof ahaan loo geystay xambaar darran (loona yaqaan sharci-darro ku-musaafurinta aadanaha) ee kaalmeeyaa wakaaladaha hirgelinta sharciga xagga ogaanta, baarista, ama ku oogidda dambiga. Xambaarka aadanaha waxaa la socda xoog, khayaano, ama jujuub si loo isticmaalo xoogga qofka ama falka ganacsiga jinsiga. Waxay ka dhici karta bulsho kasta iyo dhibbaneyaashana waxay ahaan karaan da' kasta, isir, jaad, ama qaran.

Si ay u dalbadaan xaaladda qofka aan soo haajirin (T nonimmigrant), arjiilkeyaasha waa in ay soo buuxiyaan Foomka I-914. Arjiileyaasha waa in ay Mareykanka u joogaan sharci-darro ku-musaafurinta. Xaaladda kuwa aan ahayn muhaajiriinta T waxay shaqeysaa 4 sanno kaddibna waa la dheereyn karaa marka lala kulmo daruufo kooban; dadka qaata waxay kaloo xaq u yeeshaan ruqsadda shaqada.

Kuwa aan ahayn muhaajiriinta T waxay habeyn karaan xaaladooda kaddibna waxay noqon karaan kuwa si joogto ah sharciga ku daggan waddanka (waxay qaadan karaan Kaarka Cagaaran) haddii ay xaq u yeeshaan. Qaar ka mid ah xubnaha qoyska

## Dhibaneyasha aan ahayn muwaadin waa in ay:

- Ahadan dhibane ay dhibaato badan ka soo gaartay sharci-darro ku-musaafurinta
- Qof haan Mareykanka u joogaan arrin la xariirto sharci-darro ku-musaafurinta
- U hoggaansamaan codsiyada macquulka ah ee laga codsado wakaaladda hirgelinta sharciga ama xarkaalka caddeynta xagga ogaanta, baarista, ama maxkamadeyn dambiga (ama kaddib marka uu xaq



u yeeshi ka-dhaafid taasoo ugu wacan da' ama ka-dhaafid ugu wacan xanuun soo gaaray

- La kulmaan dhibaato aan caadi ahayn oo darran kuna lug leh waxyeelo aan caadi ahayn oo darran haddii laga saaro Mareykanka; iyo
- In ay soo geli karaan Mareykanka ama in la siin karo ka-dhaafid.

Booqo [uscis.gov/humanitarian/victims-of-human-trafficking-t-nonimmigrant-status](http://uscis.gov/humanitarian/victims-of-human-trafficking-t-nonimmigrant-status) si aad u heshid macluumaad badan.

**Xambaarka shaqada (shaqada qasabka)** waa marka laga fa'iideysto qofka si loogu shaqeysto ama si loo adeegsado taasoo loo isticmaalo xoog, khayaano, ama jujuub.

**Xambaarka jinsiga** waa marka laga fa'iideysto qofka si looga helo falka ganacsiga jinsiga taasoo loo isticmaalo xoog, khayaano, ama qasab. Qof kasta oo ka yar 18 sanno oo lagu qasbo ganacsiga jirka waa dhibane xagga xambaarka jinsiga sida hoos timaado sharciga Mareykanka, lana fiirinin haddii la adeegsaday xoog, khayaano, ama jujuub.

**Joogitaan Sii jira** waa xaalad magacaabid ku meel gaar ah ay socdaalka isticmaasho oo la siyo dadka ay hirgelinta sharciga u aqoonsato in ay yahii dhibaneyaal nooc darran xambaarka dadka laga yaabo in ay yahii markhaati suurtogal ah Tilmaanta Ilaha Joogtada ee la siyo wakaaladaha hirgelinta sharciga iyo qareenada madaniga: [ice.gov/ContinuedPresenceResourceGuide](http://ice.gov/ContinuedPresenceResourceGuide).

## Xaaladda Kuwa Aan Soo Haajirin U

Xaaladda kuwa aan soo haajirin U (ee loo yaqaan fiisada U) waxay qofka siisaa badbaadinta socdaalka ku meel gaarka ah lana siyo dhibaneyasha lagu tilmaamo hawlaho dambiga Mareykanka ee laga helay kaalmo, ama haddaba laga helo kaalmo. Ama u badan in ay kaalmo ka helaan wakaaladaha caddeynta xagga ogaanta, baarista, ama dacweyn taawo dhibaneyasha lagu tilmaamo dambil, lana kulmo sharuudaha kale. Xaaladda qofka aan soo haajirin U waxay shaqeysaa muddo 4 sanno, waxaa la fidin karaa daruufu kooban; dadka qaata waxaa kaloo loo ogol yahay ruqsadda shaqada. Xaaladda qofka aan soo haajirin U wuxuu awood u yeelan karaa in uu habeeyo xaaladiisa kaddibna ahaado daggane sharci ku joogo waddanka (qaato Kaarka Cagaaran) haddii uu xaq u yeesho. Waxaa kaloo dhici karta in qaar ka mid ah xubnaha qoyska in ay xaq u yeeshaan xaaladda qofka aan soo haajirin U.

### Dhibaneyasha hawlaho\* lagu tilmaamo dambiyada soo socda waxay xaq u yeelan karaan xaaladda qofka aan soo haajirin U:

- Afduub
- Xumaanta Taabashada Jinsiga
- La Hayste
- Handadaad
- Dagaalka guriga
- Baad
- Qofka oo Awood La'aan la soo Xerto
- Weerarka lagu Sifeeyo Dambi Culus
- Gudniinka Dhedigga
- Khayaanada Kunturaadka Shaqada Dibadda (Foreign Labor Contracting)
- Kuwa aan isu tagi karin
- Ku Shafeysi
- Af duubid
- Dil
- Hor istaagidda Cadaaladda
- Xamaali
- Been abuur
- Dhileysi
- Kufsi
- Weerarka Jinsiga
- Ka Fa'iideysiga Jinsiga
- Tijaarada Adoonsiga
- Gaadid
- Cadaabid
- Xambaar
- Dambiga Celcelinta Sharci Darrada
- Faragelinta Marqaatiga
- Waxyaabaha kale ee la xariira Dambiyada†

\* Waxaad kaloo ku dartaa iskudayidda, shirqoolka ama ku qalqaalinta in la sameeyo mid ka mid ah kuwa kor ku qoran iyo dambiyada la xariira.

† Waxaa ka mid hawlaho la midka ah sida xubnaha dambiga si la taaban karo isugu mid yahii

Si loo dalbado xaaladda qofka aan soo haajirin U, dhibanaha waa in uu soo gudbiyo Foom-918. Sidoo kale, dhibanaha waa in uu soo gudbiyo, Waxaad kaloo ku dartaa iskudayid, shirqool,

ama dalab in la geysto mid ka mid ah kuwa kor ku qoran iyo dambiyada la xariira. Waxaa ka mid ah hawlaho la midka ah marka xubnaha dambiga ka kooban yahay dambiga ay dhab ahaan isla mid yahii. Si aad u codsatid xaaladda qofka aan soo haajirin U, dhibanaha waa in uu codsigiisa soo raaciyo shahaadda Foomka I-918, Supplement B) lagana soo saxiixo sarkaal ka tirsan wakaaladda ansixinta. oo xaqqiisa in dhibanaha uu waxtar leeyahay xagga ogaanta, baarista, ama maxkamadeynta kiiska, iyo in ay la kulmaan sharuudaha kale ee loo ogolaado. Saraakiisha ansixinta waa in ay la socdaan in saxiixa shahaadada in aysan siin doonin badbaada socdaalka – USCIS keliya ayaa awood u leh in ay bixiso ama diido codsiga fiisada U.

Si aad u heshid macluumaad badan, booqo [uscis.gov/humanitarian/victims-of-criminal-activity-u-nonimmigrant-status](http://uscis.gov/humanitarian/victims-of-criminal-activity-u-nonimmigrant-status).

## Dhibaneyasha aan muwaadin ahayn waa in ay

- Ahadan dhibaneyaal hawl dambiyeed la xariira ee lala kulmay waddanka Mareykanka gedhiisa ama la jebiyay sharci u dagsan Mareykanka.
- Loo geystay xumaan jirka ama madaxa taasoo ka dhallatay hawl dambiyeedka la xariirta.
- Haystaan macluumaad lagu kalsonaan karo iyo leysku halen karo oo ku saabsan hawl dambiyeedka la xariirta, iyo
- Ahadan, ahayeen, ama u badan tahay in ay kaalmeyaan hirgelinta sharciga, maxkamadeynta, garsooreyaasha, ama sarakhiisa kale ee qaabilسان ansixinta xagga ogaanta, baarista, iyo maxkamadeynta hawl dambiyeedka la xariira; iyo
- Ahadan dad loo ogolaan karo Mareykanka ama loo ogol yahay in laga dhaafu sharuudaha qaar.

## Ilaha Hirgelinta Sharciga Fiisada T iyo U

### Tilmaamaha la siyo kuwa ansixiya waxaa laga heli karaa:

[uscis.gov/tools/information-for-certifying-officials-law-enforcement-judges-and-other-agencies](http://uscis.gov/tools/information-for-certifying-officials-law-enforcement-judges-and-other-agencies)

Si aad ula xariirtid telefoonka sarkaalka ansixinta, wac 240-721-3333

Nambarkan waxaa loogu talgalay oo keliya in ay isticmaalaan sarakhiisa ansixinta. Sarakhiisa ansixinta waa sarakhiisa qaabilسان hirgelinta sharcibga, xeer ilaaityeyaasha, garsooreyaasha, ama wakiilada ka socda xafiis ama wakaalad mas'uuliyad ka saaran ogaashada, baarista, ama maxkamadeynta hawl dambiyeedka ama xambaarka, ama dacwad ku qaado ama ciqaabto dambiga ay dhibaato badan ka soo gaartay xambaarka, ama dambi ku soo ooga, ama ciqaab siyo qofka dambiga geystay.